Ku socota qaxootiga iyo doolka:

Wargelin kooban oo la xidhiidha fursadahaaga iyo xuquuqdaada

SOMALISK

DANSK FLYGTNINGE HJÆLP

SOCIALMINISTERIET

Ældre Sagen

Araar

Dansk Flygtningehjælp iyo Ældre Sagen ayaa wadajir u diyaariyay qoraalkan kooban ee wargelinta ah, oo wax yar kaaga sheegaya fursadahaaga iyo xuquuqdaada Denmark, marka aad tahay qof waayeel ah. Halkan waxa aad ka helaysaa warar ku anfacaya, sidoo kale waxa aad wax yar ka ogaanaysaa, hawlgalada Dansk Flygtningehjælp iyo Ældre Sagen ugu deeqaan dadka waawayn.

Qoraalkan kooban waxa aad ka akhriyi kartaa:

- Nololmaalmeed firfircoon
- Hawlgabka iyo dhaqaalaha
- Caawimada maalinlaha ah
- Guryaha waayeelka

Qoraalkan koobani kama jawaabayo dhamaan su'aalahaaga, laakiin waxa aanu rajaynayaa, in marka aad akhrido aad wax badan ka ogaan karto xuquuqdaada iyo fursadahaaga Danmark.

Haddii aad qabto su'aalo aan jawaabtooda laga helayn qoraalkan kooban, waxa aad had iyo jeer waydiin kartaa dawladdaada hoose ama qof ka mid ah lataliyeyaashayada.

Mahadsanidin

Dansk Flygtningehjælp iyo Ældre sagen

Nololmaalmeed firfircoon

Haddii aad tahay qof waayeel ah waxa aad weli fursad u haysataa, in aad firfircoonidaada ilaashato iyo in aad xidhiidh la yeelato dadka kale. Dansk Flygtningehæjlp iyo Ældre Sagen labaduba waa ururo leh dhaqano fiican oo ah xaga shaqooyinka is xilqaanka ah, oo waxyaabo badan iyo hawlgallo ugu deeqa dadka waayeelka ah.

Dad badan ayaa ku shaqeeya is xilqaan, waayo waxay rabaan, in ay lacag la'aan ku caawiyaan dadka kale.

”Wax badan baa na mideeya, marka la barbar dhigo waxyaabaha na kala kaxeeya”

Eva Bovien, oo is xilqaan kaga shaqaysa Ældre Sagen

Dansk Flygtningehjælp

Dansk Flygtningehjælp waa urur aan dawli ahayn oo dadnimada ka shaqeeya, oo qabta waxyaabo ay ka mid yihiin, in waayeelka ajenabiga ahi si fiican ugu qalabaxaan Danmark. Mutadawiciinta dheenishka ah iyo kuwa ajinebiga ah labaduba waxa ay dardar geliyaan xiisahooda la xidhiidha, in qaxootigu si fiican ugu qaalabaxaan dalka.

Hoos waxa ku qoran qaar ka mid ah hawlgalada socda:

- Tababarka luqad fudud
- Wada cuntayn / cunto samayn
- Tamashle iyo bixitaan
- Qolal kombuyuutar
- Naadiyada haweenka
- Booqashooyin habaysan
- Wada joogis

Haddii aad rabto faahfaahin dheeraad ah oo la xidhiidha waxyaabaha ka socda xarumaha medaniga ah, waxa aad ka heli kartaa kooxaha medaniga ee is xilqaanka ku shaqeeya ee Dansk Flygtningehjælp. Waxa aad ka helaysaa cinwaanada kooxaha is xilqaanka ku shaqeeya bogga internetka ee Dansk Flygtningehjælp: www.flygtning.dk.

”Luqadaydu way fiicnaatay, waana aan ka helaa la joogistooda”.

Faezha Boka

Hawlgallada waayeelka qaxootiga ama doolka ah

Ældre Sagen iyo Dansk Flygtningehjælp ayaa ugu deeqda waayeelka qaxootiga iyo doolka ah hawlgallo loogu talagalay iyaga ama ay ka qaybqaataan. Halkaas waxa aad kula kulmi kartaa waayeel kula jinsiyad ah ama kaa jinsiyad duwan oo aad wada sheekaysataan.
La xidhiidh guddida madaniga ah ee Ældre Sagen ama kooxda isxilqaantay ee madaniga ah ee Dansk Flygtningehjælp, haddii aad rabto in aad faahfaahin ka ogaato, waxa ka socda Xarunta agagaarkaaga ah.

Ældre Sagen

Ældre Sagen waa urur xubneed ka shaqeeya, sidii ay u fiicnaan lahayd xaaladda waayeelka Danmark, iyo sidii loo dhawri lahaa danahooda.

Guddiyada medaniga ah ee Ældre Sagen waxa ay diyaariyaan hawlo is xilqaan ah, oo laga fuliyo goobaha madaniga ah.

Hawlgallada xubnaha:
Way kala duwan yihiin hawlgallada ay qabtaan xubnaha goobaha madaniga ahi.

> "Qofkii waayeel ah waxaan odhan lahaa: kaalay oo nala joog. Nala baashaal, saaxiibo yeelo oo baro"
>
> *Sajida Mohamed Said*

Waxa ay noqon karaan tusaale ahaan:

- Hawlgallo isboorti ah (sida socod kooxeed, luufka, iwm.)
- Kooxo qabta farsamooyinka gacanta
- Qolal kombuyuutar
- Wada joogis

Hawlgallo ku caawin kara maalintii:
Ældre Sagen waxa ka socda hawlgallo ay kaa taageeri karaan, kuna caawin karaan dad kale.

Dhammaan hawlgalladaasi waa bilaash, umana baahnid, in aad xubin tahay.

Waxa ay tusaale ahaan noqon karaan:

- La joogista waayeel kale
- Qof kuu raaca dhakhtarka, dhakhtarka ilkaha iyo cusbataalka
- Saaxiib kuula baxa tamashle
- Qof kuu yimaadda oo ku soo booqda
- Kaa caawiya akhriska waraaqaha ka yimaadda dawladda hoose

Haddii aad rabto faahfaahin la xidhiidha waxyaabaha Ældre Sagen ka qabto xaruntaada medaniga ah, waxa aad ka heli kartaa guddida medaniga ah. Cinwaannada iyo lambarada tilifoonnada waxa laga heli karaa bogga intarnetka ee Ældre Sagen www.aeldresagen.dk ama buuga tilifoonnada ee medaniga ah.

Bogga intarnetka ee www.finfo.dk waxa aad ka helikartaaliiska ururada ajanebiga ah, ee degmadaada, waana aad la xidhiidhi kartaa, si aad wax uga sii ogaatid.

Hawlgabka iyo dhaqaalaha

Hawlgabka dadwaynaha

Danmark waxa aad codsan kartaa hawlgabka dadwaynaha, marka aad gaadho 65 jir. Waxa aad marka hore ka soo qaadanaysaa arjiga codsiga dawladdaada hoose, iyada oo ay tahay in aad xusuusato oo buuxiso oo u dhiibto dawladda hoose. Haddii aad qaadato hawlgabka muddada horteed si toos ah ayaad u gelaysaa hawlgabka dadwaynaha marka aad gaadho da'da hawlgabka.

Shuruudaha hawlgabka dadwaynaha
Si aad u qaadato hawlgabka dadwaynaha, waa in marka hore jinsiyadd-aadu tahay dheenish, oo aad degganayd Danmark ugu yaraan 3 sano laga bilaabo marka aad gaadhay 15 jir ilaa 65 jirkaaga.

Haddii aad tahay qaxooti la aqoonsaday oo dalka yimi ka hor 2011kii, markaas toos ayaad u helaysaa hawlgabka dadwaynaha ee ugu sareeya. Haddii aad timi ka dib 1dii jeenaweri ee 2011 waxa lagugu dhaqayaa xeerarka cusub. Waydii dawladdaada hoose.

Haddii jinsiyaddaadu aanay ahayn dheenish, waxa suurtagal ah in aad hesho hawlgabka dadwaynaha, haddii aad ka timid dal uu Danmark ka dhexeeyo heshiiska hawlgabku.

Heshiiska hawlgabku waa heshiis ay la gashay Danmark dalal badan, oo khuseeya hawlgabka. Macnihiisu waa, in dadka ajenabiga ah ee ka yimi dalalka heshiiska lala galay qaadan karaan hawlgabka dadwaynaha.
Sannadkii 2010, dalalka ay Danmark heshiiska kula jirtay waxay ahaayeen Australia, Bosnien-Herzegovina, Kanada, Chile, Israel, Kroatia, Makedonia, Marokko, New Zealand, Pakistan, Serbia, Montenegro, Tyrkiga, USA, og Iswisarland.

Haddii aad ka timi dal kale, oo Danmark aanay la lahayn hashiiska hawl-gabka, waa in aad ugu yaraan Danmark degganayd 10 sano min 15 jirkaagii, oo ay ku jirto 5tii sano ee ugu danbeeyay, markaad gaadhay 65 jirka.

Haddii aad ka timi dalalka EU-da, EØS ama Iswisarlad, qasab maaha in jinsiyaddaadu dheenish noqoto si aad u hesho hawlgabka dadwaynaha.

Dakhliga iyo hoyga
Si aad u hesho hawlgabka dadwaynaha ee ugu sareeya waa in aad Dan-mark deggenayd ugu yaraan 40 sano, intii u dhaxaysay 15 jirkaagii ilaa 65 jirkaagii. Shuruudu waa in aad dalka degganayd uun, laakiin lagaama rabo in aad shaqaynaysay.

Haddii aad deggenayd Danmark in ka yar 40 sano, waxa aad helaysaa hawlgabka dadwaynaha oo dhiman – ka loo yaqaan brøkpension. Inta uu le'ekaanayo hawlgabka dadwaynaha ee dhimani waxa ay ku xidhnaa-naysaa, muddada aad deggenayd Danmark. Haddii aad tusaale ahaan deggenayd 12 sano, waxa aad helaysaa 12/40 marka loo eego hawlgab-ka dadwaynaha ee buuxa oo dhan 40/40.

Qaxootiga yimid Danmark ka dib 1da jeenaweri 2011 waxa lagu dhaqayaa xeerar cusub. La xidhiidh dawladdaada hoose.

Dalka debeddiisa oo aad ku qaadato hawlgabkaaga dadwaynaha
Haddii aad ka fikirayso, in aad dalka debeddiisa ula wareegto hawlgabkaaga dadwaynaha, waa in aad la soocto arrimahan soo soda:

1. haddii jinsiyadaadu tahay deenish, oo aad Danmark deggenayd ugu yaraan 10 sano min 15 jirkaagii, dalka debeddiisa waad ula wareegi kartaa hawlgabkaaga dadwaynaha. Waxa aad waayaysaa uun kabitaankii hawlgabka (eeg qodobka.3.)
2. Haddii jinsiyaddaadu aanay ahayn dheenish, waa in aad baadho, in aad ka timid dal uu ka dhexeeyo Danmark heshiiska hawlgabku. Haddii aad ka timid waad qaadan kartaa lacagta asaasiga ah. Taasi waxa ay ka dhigan tahay, waad waayaysaa kabidda hawlgabka (eeg qodobka.3.)
3. Haddii aad u wareegto dalalka nordigga, dalalka EU-da/EØS ama Liechtenstein ama Iswisarland, waad qaadan kartaa lacagta asaasiga ah iyo kabidda hawlgabkaaga labadaba.

La xidhiidh Pensionsstyrelsen, Landemærket 11, 1119 København K, tlf. 33 95 50 00, haddii aad rabto faahfaahinta hawlgabka dadwaynaha ee dalka debeddiisa loola wareegayo.

Haddii aad tahay qaxooti, oo aad rabto in aad hawlgabkaaga dadwaynaha ula wareegto dalka debeddiisa, waa in aad la socoto, in si kale oo cusub loo xisaabinayo hawlgabkaaga. Inta aad helaysaa waxa ay ku xidhan tahay, muddada aad Danmark deggenayd min 15 jirkaagii ilaa 65 jirkaagii, ka hor intii aanad helin hawlgabka. Taasi waxa ay ka dhigan tahay, in aanad ku helayn hawlgabka dadwaynaha oo buuxa dalka debeddiisa, laakiin aad qaadanayso hawlgabka dadwaynaha ee dhiman – ama brøkpension.
Xeerarka la wareegista hawlgabka dadwayaha ee dalka debeddiisu way adag yihiin, sidaas awgeed waa in aad markasta la xidhiidho dawladdaada hoose ama Pensionsstyrelsen, si aad faahfaahin u hesho.

Dalka debeddiisa oo aad muddo degto
Haddii aad ku maqnaato muddo ka badan laba bilood dalka debeddiisa, meel ka baxsan dalalka EU-da/EØS, Iswisarland, Greenland iyo Feewayaasha, waxa kugu waajib ah in aad la socodsiiso dawladdaada hoose. Ka hor inta aanad dhoofin waa in aad la socodsiiso dawladda hoose maalinta aad dhoofayso iyo marka aad soo noqonayso. Isla marka aad soo laabatana, waxa kugu waajib ah, in aad la socodsiiso dawladda hoose, xilligii aad soo laabatay.

Xeerar gaar ah ayaa ku khuseeya, haddii aad tahay qaxooti oo aad u dhoofayso dalkaagii, sida marka aad u fasax tegayso ama soo booqanayso ehelkaaga. Sidaas awgeed u tag lataliye ka hor inta aanad bixin, haddii kale way saamaynaysaa c iqaamaddaada.

Kabidda caafimaadka
Cid kastaa ma qaadato kabidda caafimaadka. Waxa aad heli kartaa keli ah dakhli yar ama hanti yar oo ka baxsan hawlgabka dadwaynaha.

Waxa aad dawladda hoose ka codsan kartaa kabid yar oo caafimaad oo aad iskaga bixiso dawooyinka, dawaynta ama baadhitaanka dhakhtarka ilkaha, fodtarabootka, fisyotaroobka, lafotoosiyaha iyo dhakhtarka cilmi nafsiga. Kabidda waxa la bixiyaa kharashka, waxana sidoo kale la isa siiyaa deeq lagu bixiyo xeerka caafimaadka. Waxa kaloo aad dalban kartaa kabidda caafimaadka ee muraayadaha indhaha, ilkaha la gashado iyo daryeelka cagaha, xataa haddii aan lagu siin deeqda qarashyada ee xeerka caafimaadka.

Kabidda shakhsiga ah
Haddii lagu siiyo hawlgabka dhiman, oo aad cidhiidhi gasho dhaqaale ahaan, waxa aad dawladda hoose ka codsan kartaa kabid shakhsi ah. Dawladda hoose ayaa go'aan ka gaadhaysa dakhligaaga, qarashyadaada iyo hantida aad leedahay. Haddii dawladda hoose kugu qiimayso, in aad u baahan tahay kabid shakhsi ah, waxa ay xaaladaha qaarkood arrintu ku danbaysaa, in wadarta lacagta lagu siiyaa gaadho hawlgabka dadwaynaha ee buuxa.

Kabidda shakhsiga ah ee dawladaha hoose bixiyaan way kala duwan tahay. Kabidda shakhsiga ah looma bixiyo uun kabid lagu sameeyo hawlgabka dadwaynaha, laakiin waxa kaloo uu noqon karaa deeq hal mar la isa siiyo, ka dib marka la codsado.

Haddii xaaladdaada dhaqaale aad u adkaato, waxa aad sidoo kale dalban kartaa kabid lagaa kabo qarashka kulayliyaha – kabidda kulayliyaha.

Waa in aad adigu gaar ahaan uga dalbataa dawladdaada hoose kabidda shakhsiga ah iyo kabidda kulayliyaha.

Deeqda dheeraadka ah ee hawlgabka
Jeega waayeelka ayaa si toos ah loo bixiyaa hal mar sannadkii, oo la soo raaciyaa lacagta hawlgabka ee dabayaaqada jaanaweri. Jeegga waayeelku waa dakhli yar iyo hanti kooban oo ka baxsan hawlgabka dadwaynaha. Haddii aanu kuu soo dhicin jeegga waayeelka, oo ay kula tahay in aad xaq u leedahay, waa in aad la xidhiidho xafiiska hawlgabka ee dawladdaada hoose.

Deeqda guriga
Haddii aad qaadato hawlgabka dadwaynaha, waxa laga yaabaa in lagaa caawiyo kirada guriga. Caawimadaas waxa la yidhaahdaa deeqda guriga (boligydelse). Inta aad helayso caawimada gurigu waxa ay ku xidhan tahay, kirada gurigaaga, baaxaddiisa, inta qof ee deggan iyo wadarta dakhliga soo gala dadka guriga deggan. Hantida dul socodka ah ayaa sidoo kale kaalin wayn ka qaadata, inta lagu siinayo deeqda guriga.

Deeqda guriga adiga ayaa ka codsanaya dawladdaada hoose.

Caawimada maalinlaha ah

Haddii aad is debberi kari waydo maalintii, oo aad rabtana in aad gurigaaga deggenaato, dawladda hoose ayaa ku caawinaysa.

Caawiyaha guriga
Haddii aad rabto, in aad gurigaaga deggenaato, laakiin ay kugu adkaato, in aad qabsato hawlaha maalinlaha ah, waxa aad dalban kartaa caawiye guri. Waxa lagaa caawin karaa qubayska, beddelashada dharka iwm, waxa kale oo lagaa caawin karaa nadaafadda, dhaqista dharka, soo adeegasha iyo keenista cuntada qadada.

Haddii aad si joogto ah ugu baahan tahay caawiyaha guriga, markaa caawimadu waa bilaash. Haddii aad muddo yar u baahan tahay caawi-

mada, waxa markaas laga yaabaa in aad wax iska bixiso. Waxa ay ku xidhan tahay dakhligaaga.

Adiga ayaa dawladdaada hoose ka codsanaya caawimada guriga, iyadoo la qiimaynayo baahidaada, iyo heerka caawimada lagu siinayo.

Tababarka
Haddii cudur ama shil hoos u dhigaan awooddaada hawlgelineed, waxa suurtagal ah in aad hesho dib u tababaris bilaash ah, si aad u soo celin karto awooddaadii hawlgelineed gebi ahaan ama intii ugu badan ee suurtagal ah. Haddii aad cisbitaalka gashay, dhakhtarka laanta ayaa ku shaqo leh, in lagu siiyo dib u tababaris, taas oo aad xaq ugu yeelanayso dawladda hoose ama cusbitaalka dib u tababaris bilaash ah, marka aad ka soo baxdo dhakhtarka. Haddii aanad cusbitaalka gelin, dawladda hoose ayaa kuugu deeqi karta dib u tababaris bilaash ah.

Dawladda hoose ayaa sidoo kale kafaalo qaadaysa, in ay kuugu deeqdo caawimo aad dib ugu soo celiso awooddaada, haddii ay hoos u dhacday awooddaada hawlgalku.

Kalkaaliyaha caafimaadka ee guriga
Kalkaaliyaha caafimaadka ee guriga ayaa kaa caawin karta daryeelka, dawada, taageerada iyo la talinta adiga iyo qoyskaaga. Dhakhtar ayaa qiimaynaya, in aad u baahan tahay , in ay guriga kuugu timaaddo kalkaaliye caafimaad. Waxa uu noqon karaa dhakhtarkaaga, dhakhtarka heeganka ah ama dhakhtarka cusbitaalka.

Booqashada kalkaaliyaha caafimaadka ee gurigu waa lacag la'aan.

Wax ka bedelida guriga iyo qalabka
Dawladda hoose ayaa qofka ugu deeqda qalabka uu u baahan yahay. Qalabka ay tahay in uu kuu fududeeyo xaaladda nololmaalmeedkaaga ee guriga, haddii aad qabto dhibaato jidheed oo joogto ah. Qalabkaasi waxa uu noqon karaa waxyaabo badan oo kala duwan, sida sharaabado giijiya jidhka, kursiga naafada, kursiga qubayska, tukube iwm.

Waxa suurtagal ah, in gurigaaga wax laga bedelo sida kaabada guriga oo la simo, qalabka degitaanka iyo soo fuulida oo lagu dhiso salaanka, isbedell lagu sameeyo xamaamka iwm.

Wax ka bedelka guriga iyo qalabku waa bilaash.
Waa in aad la xidhiidho dawladdaada hoose, haddii ay kula tahay, in aad u baahan tahay gurigaaga oo wax laga bedelo ama qalab ku caawiya.

Booqashada guriga
Dhamaan dadka deggan Danmark, ee da'doodu gaadhay 75 jir, waxa loogu deeqaa booqasho guri, oo qof dawladda hoose ka shaqeeyaa ugu yimaado guriga.

Ujeedada booqashadu waa in uu kaala hadlo nololmaalmeedkaaga, kulana socodsiiyo waxyaabaha waayeelku sameeyo ee ka socda dawladdaada hoose ama ururrada degmadaada. Booqashada gurigu waxa ay fursad kuu siinaysaa, in aad wax ka waydiin karto caawimada guriga, qalabka, guryaha waayeelka ama su'aalo kale oo la xidhiidha nolosha dadka waawayn ee Danmark.

Dawladdaada hoose ayaa kuu soo diraysa waraaq ay kuugu deeqayso booqasho guriyeed, marka aad gaadho 75 jir. Dawladda hoose kuugu deeqi mayso booqasho guriyeed, haddii aad dawladda hoose ka hesho caawimada guriga.

Guryaha waayeelka

Haddii aad jilicdo ama ay kugu adkaato, in aad ku noolaato gurigaaga, waxa aad codsan kartaa guri gaar ah oo ka mid ah guryaha waayeelka. Waxa uu ka mid noqon karaa guryo dabaqyo ah oo wiish leh, ama guryaha labada dabaq ah ee beerta yar leh. Waxa aad ka codsanaysaa dawladdaada hoose, oo xilqaadaysa, in lagu siiyo guri noocan ah. Waxa la iska bixinayaa deebaaji iyo kirada guriga, waxana aad codsan kartaa in lagaa caawiyo kirada guriga (deeqda guriga).

Guryaha daryeelka
Haddii aanad isku deberi karin gurigaaga, oo aad maalintii oo dhan u baahan tahay caawimo, waxa aad codsan kartaa guryaha daryeelka. Shaqaale ku caawin kara ayaa jooga maalintii oo dhan. Waxa aad ka heli kartaa caawimo ah daryeel shakhsi ah, sida caawimooyinka asaasiga ah iyo cunto diyaar ah.

Marka aad deggan tahay guryaha daryeelka, waxa kuu socoaya hawlgabkaagii dadwaynaha, oo aad isaga bixinayso kirada guriga, laydhka iyo kulaylka, sidii guryaha caadiga ah. Daryeelka iyo caawimada kale ee lagu siiyo kama bixinaysid lacag.

Guryaha daryeelka waxa aad gelaysaa guri aad iska leedahay, oo u furan goobo la wadaago.

Haddii dawladdaada hoose kuu ogolaato guryaha waayeelka ama guryaha daryeelka, waad u guuri kartaa dawlad hoose oo kale. Waxa shardi ah, in dawladda hoose ee aad u guuraysaa, iyaduna ku ogolaato.

Tarjubaan

Goorma ayaad heli doontaa tarjubaan khabiir ah?
Xeerarka la xidhiidha goorta aad heli karto tarjubaan ay bixiso dawladdu ayaa ku xidhan, muddada aad deggenayd Danmark. Haddii tusaale ahaan aad tagto dawladdaada hoose, ama dhakhtar, ama cusbataal iyo meelaha la midka ah, iyaga ayaa qiimaynaya, in turjubaan joogo marka aad wada hadlaysaan. Waxa ay qiimaynayaan, in aad u baahan tahay tarjubaan iyo in ay tahay, in aad iska bixiso.

Sida xafiisyada kale oo dhan, waxa ku waajib ah, in ay suurtageliyaan in wax walba lagu fahansiiyo. Waxa kale oo ku waajib ah, in ay hubiyaan, in aad fahanto farriintooda. Sidoo kale waxa ku waajib ah, in ay hubiyaan, in ay fahmeen waxa aad sheegayso.

Sidaas awgeed markasta waxa habboon, in aad ogaato in ay kuu suurtagelayso, in aad hesho tarjubaan khabiir ah.

Ku laabashada dalkii hooyo?

Dawladdaada hoose ayaa laga yaabaa in ay dhaqaale ahaan ku taageerto, haddii aad ku laabanayso dalkaagii – iyo sidoo kale haddii ay kuu suurtageli waydo, in aad hesho hawlgabka dheenishka. Waxa laga hadlayaa qarashka safarka, qaadashada hantidaada, caymiska bukaanka, dawada iyo qalabka dawaynta. Waxa intaas dheer lacag gacan qabasho ah, oo aad wax kaga qabsato dalkaagii. Lacagtaasi waa 100.000 kr. iyo dheeraad, lacagtana waxa loo kala bixinayaa laba qaybood. Qaybta kowaad waa safarka, qaybta labaadna waxa qofka la siinayaa marka uu dalkiisa joogo 1 sano. Haddii aad dhaqaale ahaan isku filnaan karin waydo, marka aad dalkaaga ku laabato, waxa markaasna suurtagal ah, in bil walba lagu siiyo lacag go'an.

Faahfaahin dheeraad ah oo la xidhiidha fursadaha taageerooyinka, waxa aad ka helaysaa Dansk Flygtningehjælp, tilifoonka 33735000 ama ka akhri bogga innternetka: **www.flygtning.dk/atvendehjem .**

La talin

Waxa had iyo goor habboon, in aad la xidhiidho la taliye, haddii aad wax ka shakido.

Wadajir ahaan ayaa Dansk Flygtningehjælp iyo Ældre Sagen u leeyihiin la taliyayaal khubaro ku ah, arrimaha la xidhiidha waayeelka iyo qaxootiga/ iyo arrimaha doolka.

La talintaasi waa bilaash, xafiisyada dawladdana waanu ka madaxbanaan nahay. Adigoo magacaaga aan sheegin ayaad la soo xidhiidhi kartaa qaybta latalinta ee labada hay'adoodba.

La talinta qaxootiga iyo doolka ee Dansk Flygtningehjælp
Dhinacyo badan oo nolosha Danmark ah ayaa lagaala talin karaan – sida su'aalaha la xidhiidha go'aamada loo cuskado xeerka ajaanibka (reeraha la keenayo, deggenaansha ábadiyanka ah iwm.), xeerka qalobixinta, sharciga arrimaha bulshada (deeqaha dhaqaale iyo taageerooyinka kale), jinsiyadda deenishka, hawlgabka, xeerka qoyska iyo go'aamada sharciyada kale. Waxa sidoo kaloo qofka lagala taliyaa arrimaha nafsiga ah iyo kuwa bulsheed: sida dhibaatooyinka qoyska, siyaabaha loo daweeyo iwm.

La talintu kama gaadho kiiska go'aan rasmi ah, laakiin waxa ay ku deeqdaa talo iyo tusaalayn. La talintu way furan tahay, madaxbanaan tahay, waana qarsoodi. La talintu waa bilaash, waxana ku deeqda khubaro isxilqaantay.

Dansk Flygtningehjælp waxa ay xafiisyo la talineed ku leedahay dalka oo dhan, haddii ay tahay magaalooyinka waawayn iyo kuwa yaryar. Waxa aad ka helaysaa cinwaannada iyo xilliga furitaanka bogga intarnetka www.flygtning.dk/danmark/tilbud-til-flygtninge.

La talinta xubnaha Ældre Sagen
La talinta ayaa kaa caawin karta su'aalaha khuseeya arrimaha bulshada iyo sharciyada. Tusaale ahaan arrimaha khuseeya hawlgabkaaga, guriga, daryeelka iwm. La talintu kama gaadhi karto kiiskaaga go'aan rasmi ah, laakiin waxa ay ku deeqdaa talo iyo tusaalayn.

Waxa kula talinaya kiis maareeyayaal iyo garyaqaanno.

Tilifoon ayaad kula soo xidhiidhi kartaa la talinta. Tilifoonku waa bilaash, waxana lagu hadlaa af dheenish.

Xilliyada furitaanka: Isniinta, salaasada iyo arbacada 10-14 saac. Khamiista 14-18 saac.

Soo wac tilifoonka. 80301527

Ældre Sagen waxa ay sanad kasta soo saaraan buugga "Værd at vide" oo ka hadla wararka arrimaha bulshada, sharciga iyo dhaqaalaha ee khuseeya dadka waayeelka ah. Waxa aad ka heli kartaa bogga intarnetka www.aeldresagen.dk/Medlemmer/raadgivning/vaerdatvide

2. udgave, 1. oplag 2011/3000/Somalisk. Grafik/Design: Ida Magdalene. Tryk: TopTryk

DANSK FLYGTNINGE HJÆLP
Borgergade 10, Postboks 53
1002 København K
Tlf.: 33 73 50 00
drc@drc.dk
www.flygtning.dk

SOCIALMINISTERIET
Holmens Kanal 22
1060 København K
Tlf.: 33 92 93 00
sm@sm.dk
www.sm.dk

Ældre Sagen
Nørregade 49
1165 København K
Tlf.: 33 96 86 86
aeldresagen@aeldresagen.dk
www.aeldresagen.dk